



Barnamijka Kaalmada Lacagta Joogtada ah ee Caymiska ee loogu talagalay Shaqaalaha Xarumaha Daryeelka Carruurta

► Barnamijka Kaalmada Lacagta Joogtada ah ee Caymiska ee loogu talagalay Shaqaalaha Xarumaha Daryeelka Carruurta?

Intii lagu guda jirey muddada kullanka sharci-dejinta ee 2021, Laanta Sharci-dejinta Washington waxay u qoondaysay \$30 milyan barnamijka kaalmada lacagta joogtada ah ee caymiska oo cusub shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta ee shatiyada haysta. Barnamijku wuxuu hiisanayaa in uu ku caawyo shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta in ay awoodaan caymis caafimaad iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*.

Shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta ee shatiyada haysta ee xaqa u leh (oo ay ku jiraan barnamijyada daryeelka carruurta ee guriga qoyska, xarun ku saleysan, da'da iskuulka iyo kuwa bannaanka ee dabeecadda ku saleysan) waxay ku heli karaan caymiska caafimaadka Cascade Care Silver iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder* lacagta joogtada ah ee caymiska oo \$0 bishii.

► Muddo intee le'eg ayay dheeftani soconeysaa?

Shakhsiyadka ka soo baxa shuruudaha xaqq-u-yeelashada waxaa lacagahooda joogtada ah ee caymiska ee bil kasta bixin doonna dowladda inta sannadka ka harsan kuwas oo loo arko in ay xaqq u leeyihiin (haddii ay ka baxaan barnamijka mooyaane ama ay u wareegaan qorshe aan ahayn Cascade Care silver). Shakhsiyadka waa in ay isdiiwaangeliyan ka hor 15-ka bisha si caymisku uu u bilowdo kowda bisha ku xigta. Tusaale ahaan, haddii shakhsiga lagu qorey barnamijka 14-ka Maarso, caymiskiisu wuxuu bilaaban doonaa 1-da Abril. Haseyeeshee, haddii shakhsiga la diiwaangeliyay 16-ka maarso (ka-dib 15-ka loo qabtey), markaa caymiskiisa wuxuu bilaaban doonaa 1-da Maajo.

► Muxuu barnamijkan caymiya?

Barnaamiju wuxuu caymiya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee bilaha ah ee loogu talagalay shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta ee xaqa u leh. Macaamiishu waxay mas'uul ka yihiin bixinta lacagaha laga jari karo, lacagaha caymiska ee la wadaago iyo kharashaad kasta ee la xiriira raadinta adeegyo caafimaad. Fadlan ogow in haddii isdiiwaangelintaada la taabogaliyay ay ku lug leedahay u beddelashada qorshe kale iyadoo la marayo sannadka bartamahiisa, lacagaha lagaa jiri karo ayaa waxaa dib u xaddidi kara shirkadaada caymiska ee cusub.

► Maxaan sameeyaa haddii aan biil ka helo shirkadeyda caymiska?

Waxaad biil ka heli kartaa shirkadaada caymiska. Haddii uu qaansheegga uu la xiriira isbeddellada lacagaha joogtada ah ee caymiska ee bil kasta, fadlan iska dhaaf. Lacagta joogtada ah ee caymiska ee bil kasta ayaa waxaa la siiyaa shirkadaada caymiska iyadoo adiga lagaa wakiil yahay sida qayb ka mid ah barnamijka. Bixiyeyaasha caymiskeenna badankooda waxay sii wadi doonnaan in ay qaansheegyada u soo diraan macaamiisha iyagoo sidoo kalena qaansheegyada u dira the Exchange. Haddii aad hesho qaansheegga bil kasta ee lacagaha joogtada ah ee caymiskaaga, ha bixinin; lacagtaada joogtada ah ee caymiska annaga ayaa wada bixinna.

Haddii aad hesho biil la xiriira adeegga caafimaadka ee laguu fididley, sida lacagaha lagaa jari karo ama lacag-bixinnda la wadaago, waxaad mas'uul ka tahay in aad bixiso. Haddii aadan hubin in aad mas'uul ka tahay biil aad heshay, fadlan la xiriir shirkadaada caymiska si aad u xaqiijiso haddii ay tahay lacagtaada joogtada ah ee caymiska bilaha ah iyo in kale, ama biil la xiriira adeegyada caafimaadka ee la helay.

► Kumaan la xiriiraa haddii aan qabo su'aalo guud oo ku saabsan ka-faalooqadidda ama aan u baah-anahay in aan soo sheego isbeddellada nolosha?

Si aad uga fogaato luminta caymiska, fadlan kala xiriira Caawiyeyaasheenna ee jooga Adeegyada Caafimaadka Xaafadda Yakima (509-574-0826 ama ccnavi@ynhs.org) si aad wax isbeddello ah ugu sameyso codsigaaga. Waxay ku faraxsan yihiin in ay isbeddello sameeyaa, ka jawaabaan su'aalo kasta iyo in ay kaa caawiyaa in aad qorshahaaga fahamto. Soo sheegidda isbeddellada lagu sameynayo codsi macnaheedu ma ahan in aad ka-faalooqadidda lumineyso. Marka aad xaq u yeelato barnamijka, waxaad xaq u leedahay inta sannadka ka harsan



► Kumaan la xiriiraa haddii aan qabo su'aalo ku saabsan in dhakhtareyga ama adeegga la caymiyey?

Shirkadaada gaarka ah ayaa kaa caawin karta in aad si wanaagsan u fahamto qorshahaaga, adeeg-bixiyeyaasha shabakada ku jira, adeegyada la caymiyey, lacagaha lagaa jari karo, lacag-bixinnda la wadaago iyo sidoo kale in ay kaa caawiso helidda kaarar aqoonsi.